

Xarunta Garsoorka ee Heer Gobol ee Maleng

Xarunta Garsoorka ee Heer Gobol ee Maleng waa xarun uu adeegu u dhan yahay oo u adeegta koonfurta Degmada King. Waxa ay ku taalaa Waqooyiga Wadada Afraad ee faras magaalaha Kent una dhaw xarunta tareenada Kent, Kent Commons iyo Xarunta Showare.

Cinwaanka Dhismaha:

401 Fourth Avenue
Kent, WA 98032

Cinwaanka warqadaha loogu diro:

King County Superior Court
401 Fourth Avenue North, Room 2D
Kent, WA 98032

Maalmaha Iyo Saacadaha Shaqada:

Isniin-Jimcaha, 8:30 aroornimo-4:30 galabnimo.



- [Fasaxyada Iyo Maalmaha Aanay Maxkamaddu Shageyneyn](#)

Sidee Lagu Tagaa Halkaas [KHARIIDAD](#)

- [Khadka Baska](#) (Mareegta Khadka Basaska ee Degmada King.)
- [Gaari aad wadato](#) (Mareegta Google Maps.)
- [Macluumaadka Goobaha Gaadiidka La Dhigto](#)
- [Goobaha la dhigto Bushkuleetiya](#)

La soo deg [warsidaha](#) waxa uu faahfaahinayaa sida looga codsado adeegyada maxkamadda Xarunta Garsoorka ee Heer Gobol ee Maleng.

Fududeynta Loo Fidiyo Dadka Naafada Ah

Haddii aad naafo tahay, fadlan buuxi foomka [Codsiga U Fududeynta](#) . Sida loo buuxinayo foomka ayey la socotaa.

MRJC waa maxkamad si fudud lagu geli karo. Qolalka maxkamadaha waa kuwo u diyaarsan gaariga dadka naafada ah gaar ahaan kursiga markhaatiyaasha iyo kuraasta xeer beegtida. Goobo ay gaadiidka dhigtaan oo dadka naafada u gaar ah ayaa ku yaala dabaqa koowaad iyo labaad garaashka gaadiidka la dhigto.

Baaritaanka Gelidda Dhismaha

Waxa aad dhex mareysaa xarunta baaritaanka gelitaanka dhismaha maxkamadda. Halkan ka akhri xog dheeraad ah oo ku saabsan [alaabada aan loo ogoleyn dhismayaasha](#)

[maxkamadaha King](#). Ka daawo halkan [fiidiyoow](#) faahfaahinaya baaritaanka amaanka ee la xiriira gelitaanka dhismaha maxkamadda.

Goobta Caruurta Lagu Hayo - Waa XIRAN tahay xilligan. Fadlan la soco wixii ka soo kordha

Goobta caruurta lagu hayo waxaa la geeyaa caruurta la doonayo in maxkamadda ka markhaati furaan ama ah dhibanayaasha ah ama waalidkood maxkamadda dan kaga xiran tahay Waxa ay ku taalaa dabaqa sadexaad ee Xarunta Garsoorka ee Heer Gobol ee Maleng iyada oo furan 8:30 aroornimo. Macluumaad dheeraad ah, soo booqo [Bogga Xarunta Caruurta lagu hayo](#) ama wac (253) 854-5625.

Cuntada

Meel qaxwaha laga cabo ayaa ku dhow albaabka laga galo dabaqa koowaad ee dhismaha maxkamadda, iyo makiinadaha cuntada fudud lagala baxo ayaa ku yaal dabaqa koowaad iyo dabaqa labaad ee qolka xeer beegtida. Maqaayado kale oo fara badan ayaa ku dhowdhow.